1 Oktoobar 2021

Gacaliyaha Waalid iyo Daryeeleyaal ahow,

Waxa aan warqadan kuugu soo qoreyno waa inaan idinka codsano inaad na taageertaan. Waxa ay u badan tahay inaad dhowrkan bilood ee aan ku jirno gudahooda arkeyseen warbaahinta oo hadal heysa dhacdooyin ku saabsan haween iyo gabdho la waxyeeleeyey. Waxaa jirey warar iyo muuqaalo laga welwelo oo ku saabsan Sarah Everard, oo aheyd hawl-fuliye Suuq-geynta qaabilsan, oo la jeebadeeyey, la af-duubey, la kufsadey, lana diley iyada oo gurigeeda u lugeyneysa, iyo xitaa Sabina Nessa, oo aheyd macallimad iskuul, oo goor fiid dhawaa ah la hujuumey, la weerarey lana diley iyada oo ka timid goob ay saaxiibo wax kula cabeysey. Inkasta oo ay nal ku ifintan wax ka tareyso ifinta waxyaabaha ay haweenka iyo gabdhaha si maalinle ah u wajahayaan iyo in la bilaabo ka hadalka iyo wax ka qabadka arrimahan, waxan waa wax muujinaya xaaladda murugeysan ee ay bulshada aan ku dhex nool nahay, ee xuquuqul insaanka hore u marka ka gaartey aysan ku guuleysan dhimista waxyeeleynta loo geysanayo haweenka iyo gabdhaha, iyo xitaa in si daacadnimo iyo ka run sheegid ah loogu dhaqmo inay haweenka iyo gabdhaha xuquuq (dadka) la siman leeyihin marka la eegayo doorkooda ah bulsho wax ku biirinta iyo xaqqa ay u leeyihiin inay ragga la siman una wada noolaadaan sidii ay yihiin shaqsiyaad tayon ahaan iyo qiimo ahaanba siman.

Waxaa dhici karta inaad rabtid ogaanshaha waxa ay iskuulada sameynayaan oo ay arrimahan wax uga qabtaan. Iyada oo la adeegsanayo PSHE (Waxbarashada ku saabsan Caafimaadka Jismi ahaan iyo kan Bulsho ahaanba), kullanada hanuuninta iyo waqtiga gudaha fasalka wax looga wadahadlo ayaan caruurtayada barnaa waxyaabo ku saabsan wada xiriirista waxtarka, caafimaadka iyo is-ixtiraamka leh, sida uu hab-dhaqanka is-ixtiraamista leh u eg yahay, u ogolaanshaha, doorarka labka iyo dhedigga, wax ka aaminsanaanta, sinaanta, isku kalsoonida jismi ahaaneed iyo isku kalsoonida qof ahaaneed, hab-dhaqanka barasho horteed fikrad uga qaadashada, iyo inay waxyeeleynta iyo dhib u geysashada mar walba qalad yihiin. Waxaa caruurta kuwan ka da' weyn intaas loogu darayaa waxyeeleynta iyo dhibista galmada la xirrira.

Si loo ifiyo sida ay arrintan u weyn tahay, waxa aan warqadan soo raaciney, waxyaabo aan ka soo qaadaney dib-u-eegis ay dhwaan hey'adda OFSTED ku sameysey takri-falka galmo ahaaneed ee gudaha iskuulada iyo koleejooyinka ka dhacay. Tan waxaa laga helayaa warqadayadan dhamaadkeed oo waxa aan kugu dhiirigelineynaa inaad akhriso si aad u fahamtid inta ay la eg yihiin dhibaatada iyo waxyeeleynta ay arrimahan geystaan oo laga heley fikradaha ay dadka da' yarta ah, qaas ahaan gabdhaha, ka dhiibteen. Waxyaabahan laga soo qaatey waxaa ku saa'id ah inay halkan ku qoran yihiin waxa ay OFSTED ka tiri wax ku saabsan xididnaanshaha waxa ay iskuulada arrintan ka sameyn karaan:

*'Iskuulada iyo Koleejooyinka keligood wax kama qaban karaan dhibista iyo waxyeeleynta galmada la xiriira oo ay ka mid yihiin kuwa online-ka lagu sameeyo, mana aha inay keligood wax ka qabtaan. Tusaale ahaan ,baahsanaanta caruurta iyo dadka da'yarta ee ee arkaya waxyaabo si waadax ah u muujinaya wax aysan rabin inay arkaan iyo in lagu cadaadinayo inay diraan muuqaalo 'qaawanaan' ah waa mushkilad ka weyn wax ay iskuulada xallin karaan. Inkasta oo ay doorkooda qaadan karaan, wuxu ma aha wax ay xallintooda iyada uun ay ka mas'uul ka saaran tahay.'*

Sidaas darteed baan maanta idinkaga codsaneynaa inaad na taageertaan oo aad xubnaha qoyskiina la fariisataan, oo halkii ay ku haboon tahayna, aad wadahadai iyo war isdhaafsi ka yeelataan arrimaha soo socda:

- **Kaftan-dhable**: sida uu 'kaftan-dhablaha' uu ku takri-falka iyo waxyeeleynta uga dhigi karo wax sahlan ama iska caadi ah oo haweenka lagu sameeyo – iyo muhiimada ay leedahay in ‘kaftan-dhablaha’ laga soo horjeesto maadaama uu yahay in haweenka shey galmo ahaan ah uun loo eegayosi ay kuwo kale u qancaan
- **Dhibane-eedeyn**: fikrada ah in uu qof yahay mid ‘u qalma in wax lagu sameeyo’ Sababtuna tahay waxa uu qofka lebisnaa ama halka ama goorta ay meel joogeen. Qofna uma qalmo in la sharaf dilo.
- **Dhibane-ceebeyn:** qofka oo erreyo sharaf dil ah loo adeegsado, qofkaas oo caadi ahaan gabar ah, haddii ay qof lab ah isla galmoodeen ama ay sawiro qaawanaan ah isku direen, xitaa haddii waxaas sameyntooda lagu juujuubey, culeys lagu saarey, lagu cadaadiyey, lagu qasbey ama lagu qayaaney.
- **Haweenka oo aalad ahaan loola dhaqmo**: gabdhaha oo qaabkooda dhibco ilaa toban ah la kala siiyo, iyaga oo lagu fooriyo, iyaga oo fikrado galmo la xiriira laga dhiibto waa tusaallooyin muujinaya in haweenka loo arkao aalad galmo ahaaneed, ee aan loo arkeynin inay insaan yihiin.

Waalid ahaan, sidiina oo kale, waxa aan weligeenba rabney waa waxa caruurtayada u fiican, haddii ay tahay wax ku saabsan tayada noloshooda, waxbarashadooda ama saaxiibadooda iyo kuwa ay xiriirka la leeyihiinba. Iyada oo aan looo eegeynin wiilal ama gabdho ahaanshahooda, waa wax uu ilmo walba xaq u leeyahay in uu barbaaro uuna hela waayo-arragnimo:

- uu noloshiisa ku helo farxad iyo nabad,
- ku kaalmeysa in uu ahaado mid mustaqbalka sameysta wax danihiisa ku salleysan.
- uu caddaalad ugu helo noloshiisa dhan walba iyo dhanka kuwa isaga ku hareereysan,
- uu ku aamino inay dhamaan la wada helo run, caddaalad iyo sinaan
- uu ku aamino kartida uu leeyahay oo uuna aduunkan wanaag ugu sameeyo.

Waxa aan si iskaashi leh ula shaqeyneynaa iskuulo Liverpool ku yaal baahsan si aan wax uga bedelno fikradada haweenka iyo gabdhaha gudaha bulshada looga heysto oo waxa aan rajeyneynaa inaad nagu soo biirto oo aad isla waxan sameysid. Waxaa kale oo aan aqoonsan nahay inay jiraan kuwo badan oo lagu dayan karo oo iskuuladayada jooga, oo lab iyo dheddigba leh, laakiin waxa aan u baahan nahay inay dadka oo idil haweenka iyo gabdhaha ula dhaqmaan si ixtiraam leh. Fadlan arrintan uga hadal gudaha shabakada qoyskaaga iyo sidii aan wadajir ahaan u keeni kari laheyn wax bedelaad bulshadayada joogto u noqota si waxyeeleynta haweenka iyo gabdhaha loo geysanayo loo joojiyo, oo sinaan loo wada helo ayna caddaaladda ka kor marto shaqsiyaadka damacsan inay xuquuqul insaanka ku tuntaan.

Waa daacad kuu ahaade,

Lifaaq

Hey'ada iskuulada Baarta ee OFSTED ah ayaa faafisey waxyaabihii ay ku soo ogaatey dib-u-eegis ay dhawaan ku sameysey ku takri-falka galmo ahaaneed ee iskuulada iyo koleejooyinka ka dhaca. Kuwan dhamaantood waa goobo waxbarasho ay lab iyo dheddig wada dhigtaan, hase ahaatee waxyaabaha la so ogaadey waa wax cad. Waxa aan kaa codsaneynaa inaad dhowr daqiiqadood siiso akhrinta waxyaabaha gaaban ee warbixinta lagala soo baxey oo aad ka dibna wax waqti ah siiso si aad macluumaadka u fahamto una hesho siyaabo aad iskuulka ugu kaalmeyn kartid sidii arrimahan wax looga qaban haddi ay tahay waxa online-ka ka dhacaya, ee banaanka iyo gudaha iskuulka ka dhaca.

Waxyaabaha dib-u-eegista OFSTED lagala soo baxey:

*Waxa ay dib-u-eegista muujisey sida ay caruurta iyo dadka da'yarta ah ugu baahsan tahay dhibista galmo ahaaneed iyo ku takri-falka galmo ahaaneed ee online-ka ah. waa wax laga welwelo inay caruurta qaarkood, dhacdooyinkan ay waxay u noqdeen wax iska caadi ah oo ma arkaan inay soo sheegistooda wax micno ah sameyneyso. Waxaa dib-u-eegista lagu ogaadey inay arrintan tahay wax aad u baahey oo u baahan in waxlagala qabto Caruurta iyo dadka da'yarta oo dhan. Waxa ay tallo ku soo jeedineysaa in ay iskuulada, koleejooyinka iyo wakaaladaha badan ee arrintan iska kaashanaya oo idil wax u qabtaan sidii ay tahay inay dhibista galmo ahaaneed iyo ku takri-falka galmo ahaaneed ee online-ka ka dhaca ay yihiin wax hadda dhacaya, xitaa haddii aysan jirin warbixino qaas ah. Booqashooyinkayaga, waxa ay gabdhaha noogu sheegeen inay dhibista galmo ahaaneed iyo ku takri-falka galmo ahaaneed ee online-ka ka dhaca, sida waxyaabo aad u muuqada oo aadan codsan oo lagu soo diro iyo in lagugu cadaadiyo soo dirista sawiro ('la qaawan yahay'), yihiin wax aad uga baahsan sida ay dadka waaweyn ay xaqiqda la tahay. Tusaalle ahaan, ku dhawaad 90% oo gabdhaha ka mid ah, iyo ku dhawaad 50% oo wiilasha ka mid ah, waxa ay sheegeen in iyaga ama saaxiibadood in badan ama mararka qaar loo soo diro sawiro aad wax uga muuqdaan ama fiidiyowyo laga soo qaadey waxyaabo aysan iyaga arragtidooda rabin. Waxa ay caruurta iyo dadka da'yarta ah noo sheegeen in ay dhibista galmo ahaaneed tahay wax si badan oo soo noq-noqod leh u dhaca oo noqdey "wax iska caadi ah". Tusaalle ahaan, 92% oo gabdhaha ka mid ah, iyo 74% oo wiilasha ka mid ah, waxa ay sheegeen in cey magac isugu yeeris galmo la xiriirta ah ay iyaga ama saaxiibadood in badan ama mararka qaarkood loo geysto. Sida isku xig-xigidda leh ee uu hab-dhaqankan isdhibka ah ee galmada la xiriira u dhacayo micnihiisu waa inay qaar ka mid ah caruurta iyo dadka da'yarta ah ayba u qaateen inay waxan iska caadi yhiin. Markii caruurta iyo dadka da'yarta ah la weydiiyey halka ay waxyeeleynta galmada la xiriira ay ka dhacdo, waxa ay sheegeen inay ka dhacdo goobaha aan la kormeerin ee iskuulka banaanka ka ah, sida xafladaha ama jardiinooyinka (parks) oo aysan dad waaweyn joogin, inkasta oo ay gabdhaha qaar noo sheegeen in iyaga oo aan rabin lagu taabtey gudaha kooridoorada iskuulka. Caruurta iyo dadka da'yarta ah, qaas ahaan gabdhaha, waxa ay noo sheegeen inaysan rabin ka hadalka ku takri-falka galmo ahaaneed dhowr sababood dartood, xitaa halkii uu iskuulkooda ka hadalkaas ku dhiirigelinayo. Tusaalle ahaan, halis ah inay go'doomin saaxiibadood uga timaada ama inay saaxiibadood mushkilad ku abuuraan, baysan wax u qalma la aheyn ka hadalka wax ay caruurta iyo dadka da'yarta ah u heystaan inay wax iska caadi ah yihiin. Waxa ay ka welwelaan sida ay dadka waaweyn arrintan uga fal-celin*

*doonaan, maxaa yeeley waxa ay moodayaan in aan la aamin doonin, ama in iyaga la eedeyn doono. Waxay kale oo ay moodayaan in marka ay qof weyn la hadlaan ka dib, ay arrintan faraha ka bixi doonto oo aysan xakamadeyn karin. Runtii caruurta iyo dadka da'yarta ah si dhif ah bay wax waxtar leh ugu arkayeen RSHE (Waxbarashada ku saabsan* Wada Xiriirka, Galmada iyo Caafimaadka) ee ay qaataan*. Waxa ay dareemeen inay tahay wax aad u yar, oo aad loola soo raagey iyo in uusan manhajka aheyn mid iyaga ku qalabeynaya macluumaaka iyo la tallinat ay ugu baahan yihiin sidii ay uga dabaalan lahaayeen xaqiiqada ay noloshooda wajaheyso. Waxa ay noo sheegeen in maadaam ay jiraan meelo ay wax ka dhiman yihiin, inay war ka doontaan barararaha bulshada ama saaxiibadooda si uu midba midka kale wax uga barto, taas oo sida la fahmi karo dhalisa inay qaarkood dhirif dareensan yihiin. Waa aida ay hal gabar hadalka u dhigtey ee, 'waa inaysan mas'uuliyadayada noqon in aan wiilasha wax barno'.*

*Cilmi-baaris 2017 la sameeyey ayaa tilmaantey in ay 26% oo dadka da'yarta ah ka mid ah ay muuqaal qaawanaan ah u direen qof ay xiiseynayeen iyo in 48% ka mid ah loo soo direy muuqaal qof kale ah. Hase ahaatee, daata waqti goortaas ka soo dhow la heley kuna saabsan muuqaalo ay sameeyey dhallinyarada kuwooda da'da 18 sano jirka ka yar jirta ayaa tilmaamaya inay sii kordhayaan sawirada iyo fiidiyowyada ay naftooda ka qaadayaan oo ay kuwo kale u sii dirayaan. Tan waxa ku jira dhacdooyin tilmaamaya inay jireen dad waaweyn oo inay Sidaas sameeyaan ku shukaaminayey. Daata laga heley hey'adda Internet Watch Foundation (IWF) waxa ay muujineysaa inay aad u kordheen muuqaalada ku takri-falka galmo ahaaneed oo online ah oo ay dad da'yar ka qeybgalayaan, taas oo qeyb ahaan wax ku biirineysa sii kororka faafinta waxyaabo uu "qofka naf ahaantiisa" iska duubey. Intii lagu jirey 6 dii bilood ee sanadkii 2020, 44% oo ka mid ah ku takri-falka galmo ahaaneed ee ilmaha ee ay hey'adda IWF wax ka qabatey ayaa la qiimeyyey inay ahaayeen muuqaalo ama fiidiyowyo uu qofka iska duubey, marka la barbardhigo inay kuwaasi ahaayeen 29% sanadkii 2019.*